



MACLUUMAADKA AMMAANKA WADDADA

ADIGA AYAA MAS'UUL KA AH AMMAANKA CARRUURTAADA MARKAY U SOCDAAN AMA KA SOO SOCDAAN DUGSIGA.

Safarka baska oo ammaan ah

Ilmahu wuxuu halis ugu jiraa inay waxyeelo gaarto ka dib marka uu ka dego baska.

Si loo yareeyo halistaas:

- Kula kulan carruurtaada joogsiga baska – marna ha-kula kulmin dhinaca kale ee waddada
- Qabo gacmaha carruurtaada marka la joogo joogsiga baska
- Istaag dhowr tallaabo ka dambaysa dhinaca waddada markaad ku sugaysa joogsiga baska
- Sug ilaa inta basku ka dhaqaaqayo, ka dibna dooro meel amaan ah si aad uga gudubto waddada.

Ka caawi carruurtaada inay helaan meel amaan ah oo ay ka gudbaan sida:

- marka la marayo meedhs dadku ka gooyo waddada ama nalalka gaadiidka, haddii la heli karo
- qayb bannaan oo waddada ah oo ay arki karaan dhammaan baabuurta.

Haddii aadan la joogi karin carruurtaada, uqabanqaabi qof weyn oo lagu kalsoon yahay inuu kula kulmo joogsiga baska.



Wixii taageero dheeraad ah

Ka-qaybgal barnaamijka Waxbarashada Ammaanka Waddada ee Wasaaradda
<https://education.nsw.gov.au/road-safety-education> ama ka eeg

<https://education.nsw.gov.au> oo baar waxbarashada ammaanka waddada.